MAINE DEPARTMENT OF LABOR

**Su'aalaha Badanaa La Iska Weydiiyo (FAQ) Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato (PFML)**

**Ogsoonow:** FAQ gani waxa uu ku salaysan yahay macluumaadka ugu wanaagsan ee la heli karo kahor inta aan la cuskan shuruucda barnaamijka PFML ka. Macluumaadkan waa kuwo isbeddeli kara. Waxa aad booqataa https://www.maine.gov/labor/pfml/ si aad uga hesho macluumaadka ugu dambeeya.

## Guudmarka sharciga Fasalka Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato:

### 1. Waa maxay Barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato (Barnaamijka PFML)?

Sharciga PFML ee Maine waxa uu bixin doonaa fasax mushahar la qaato oo illaa 12 toddobaad ah oo ah fasax qoys, milatari, caafimaad ama ammaan. Sharcigani waxa uu noqday dhaqangal Oktoobar 2023 si waafaqsan sharciga Maine. Waaxda Maine ee Shaqaalaha ayaa masuul ka ah dhaqangelinta barnaamijkan cusub.

## Lacag-isku-darista:

### 2. Halkee baa ay ka imanayaan lacag-isku-daristu laga bilaabo Janaayo 1, 2025 – miyaa lacag-isku-darista uu bixinayaa loo shaqeeyaha, shaqaalaha, ama labaduba?

Ka jarisaha mushaharka ee lagu sameeyo mushaharka iyada oo loogu talagalayo barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato waxa ay bilaabmi doontaa Janaayo 1, 2025, waxana lagu shubi doonaa Sanduuqa Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine. ("Sanduuqa PFML"). Loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha labaduba waxa ay isku daraan lacagta oo u xawilaan Sanduuqa PFML ka. Dhammaan lacagaha waa la isku daraa si loogu bixiyo sheegashooyinka mustaqbalka iyo kharashaadka maamul ee kale.

### 3. Haddii aanay dheefuhu dhaqangalayn illaa la gaadho 2026 ka, waa maxay sababta lacag-isku-darista loo sameynayaa 2025 ka?

Inkastoo dheefuhu aanay dhaqangaleyn illaa la gaadho Maajo 1, 2026, lacag-isku-daristu waxa ay bilaabmi doonaan 2025 ka si wakhti loogu helo inay ururto lacago ku filan in lagu bixiyo dheefaha iyo kharashaadka maamul ee lagaga hawlgalayo barnaamijka.

**4. Waa maxay xaddiga lacag-isku-darista ee loogu talagalay Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato?**

Sanadada 2025-2027 ka, xaddiga lacag-isku-darista oo la isku geeyey waxa lagu fadhiisiyaa 0.5 ama 1 boqolkiiba mushaharrada midkood iyada oo lagu salaynayo xajmiga loo shaqeeyaha. Loo shaqeeyeyaasha leh 15 ama wax ka badan oo shaqaale ah waxa ay ku dari doonaan 1 boqolkiiba mushaharada waxana ay ka jari karaan illaa kala badh lacag-ku-darista laga jaray mushaharada shaqaalaha. Loo shaqeeyeyaasha leh wax ka yar 15 shaqaale ah waxa ay ku dari doonaan 0.5 boqolkiiba mushaharada waxana ay ka jari karaan dhammaan xaddiga laga jaray mushaharada shaqaalaha.

**5. Waxa aan ahay loo shaqeeye waxana aan jeclaan lahaa inaan bixiyo qaybta shaqaalahayga ee lacag-ku-darista PFML-Miyaa la ii ogol yahay inaan sidaas sameeyo?**

Haa, loo shaqeeyuhu waxa uu bixin karaa qaybta shaqaalaha ee ah 0.5 boqolkiiba balse waajib kuma aha.

**6. Yaa masuul ka ah in uu lacag-ku-darista u xawilo Sanduuqa PFML?**

Loo shaqeeyaha ayaa masuul ka ah in lacag-ku-darista uu u xawilo Sanduuqa PFML. Qaabka loo xawilayo lacagaha waxa lagu sheegi doonaa hagitaanka MDOL ee mustaqbalka.

**7. Waxa aan ahay shakhsi is u shaqaysta, miyaan u qalmaa?**

Shakhsiyaadka iska u shaqaystaa waa ay u qalmaan Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato balse waa inay doortaan inay ka qaybgalaan caymis. Sanadada 2025-2027, xaddiga lacagta caymiska waxa lagu fadhiisiyey 0.5 boqolkiiba dakhliga shakhsiga kasoo gala is u shaqaysashada. Hagitaan ayaa ay bixin doontaa MDOL mustaqbalka oo ku saabsan hannaanka ka qaybqaadashada.

**<u>Qorshayaal Gaar ah:</u>**

**8. Waxaan ahay loo-shaqeeye leh siyaasad dhigaysa bixinta mushaharka wakhtiga fasaxa, wakhtiga jiirada iyo/ama siyaasadda naafada muddada gaaban. Miyaa siyaasaddayda fasaxa loo tixgalin karaa inay tahay qorshe sidii la rabay u waafaqsan Sharciga Maine PFML?**

Qaybta 850-H(2) waxay dhigaysaa si qorshayaal gaar ah loogu ansixiyo inay yihiin qaar sidii la rabay u waafaqsan yihiin sharciga, marka laga tago shuruudaha kale ee xeerkan dhigayo, qorshuhu waxa waajib ah inuu yahay mid isagu is-maalgaliya oo u baahan curaar dammaanad oo la siiyo Gobolka ama yahay qorshe si buuxda loo maalgaliyo oo laga oo gatay shirkad caymis. Siyaasad fasax oo gudeed, iyadu kaligeed ma buuxin karto shuruudahan. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka iyo shuruudaha qorshayaasha gaarka ah ayaa lagu iftiimin doonaa xeerka.

**<u>Heshiisyada Gorgortanka Kooxeed:</u>**

**9. Sidee baa sharciga PFML u khuseeyaa heshiisyada gorgortanka kooxeed ee qaybta dawladeed?**

Guud ahaan, xuquuqda iyo masuuliyadaha ku jira sharciga Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaad ee Mushaharka La Qaato waxa uu khuseeyaa loo shaqeeyeyaasha dawliga ah. Si walba ha noqotee, qaybta 850-B (10)(D) waxa ay dhigaysaa in sharcigu aanu: "[k]u waajibin loo shaqeeye dawladeed, sida lagu qeexay qaybta 962, qayb hoosaadka 7, ama shaqaale loo shaqeeye dawladeed oo qayb ka ah heshiis gorgortan kooxeed oo jiray taariikhda dhaqangalka cutub hoosaadkan inay dabaqaan wax ka mid ah xuquuqda iyo masuuliyadaha hoos yimaadda cutub hoosaadkan illaa heshiiska gorgortanka kooxeed ee jira ay taariikhdiisu dhacdo."

Xuquuqda iyo masuuliyadaha ku jira sharcigu ma khuseeyaan shaqaalaha qaybta dawladeed kuwaas oo ku jira heshiis gorgortan kooxeed oo dhaqangalay Oktoobar 25, 2023 kii [taariikhda dhaqalgalka ah ee sharciga Qoyska iyo ka Caafimaad ee Mushaharka La Qaato], illaa heshiiska gorgorta kooxeed ay taariikhdiisu dhacdo. Xuquuqahaas iyo masuuliyadahaas waxa kamid ah balse aan ku xaddidneyn shuruudaha lacag-ku-darista ee khuseeya shaqaalaha dawliga ah iyo loo shaqeeyeyaasha dawliga ah labadaba, iyo xaqa shaqaaluhu u leeyahay in uu codsado isla markaana qaato dheefaha fasaxa qoyska iyo ka caafimaadka ee mushaharka la qaato.

Sidaas darteed, loo shaqeeye iyo shaqaale dawladeed oo kasta sida ku qeexan Cinwaanka 26 qaybta 962, qayb hoosaadka 7 ee ku jira heshiis gorgortan kooxeed oo dhaqangalay Oktoobar 25, 2023 kii, lagu ma waajibin doono in uu sameeyo lacag-ku-daris la xidhiidha barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato illaa heshiiskaas gorgortanka kooxeed ay taariikhdiisu dhacdo. Taas marka laga yimaaddo, shaqaale kasta oo ku jira heshiis gorgortan kooxeed oo dhaqangalay Oktoobar 25, 2023 kii, uma qalmo in uu qaato dheefo hoos yimaadda barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato illaa heshiiskaas gorgortanka kooxeed taariikhdiisu ay dhacdo.

**10. Sidee baa ay tani u khusaysaa shaqaalaha dawliga ah ee aan ku jirin heshiis gorgortan kooxeed?**

Sharciga Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato waxa uu khuseyn doonaa shaqaale dawladeed oo kasta oo aan ku jirin heshiis gorgortan kooxeed oo dhaqangalay Oktoobar 25, 2023 kii. Sidoo kale, shaqaale dawladeed oo kasta oo aan ku jirin heshiis gorgortan kooxeed guud ahaan waa kuwo uu barnaamijku u caymiyo si lamid ah shaqaalaha qaybta aan dawliga ahayn.

**11. Sidee baa sharciga PFML u khuseeyaa heshiisyada gorgortanka kooxeed ee qaybta aan dawliga ahayn?**

Cafinta ku jirta qaybta 850-B (10)(D) ma khusayso heshiisyada gorgortanka kooxeed ee qaybta aan dawliga ahayn.